Dabeecadaha Kelitalsinimada & Gaboodfallada ka Dhasha Midiidinta

WQ: Cabdiraxmaan Al Kawakibi Tarjumadii
Dr. Maxamed Sh. Cali (Doodishe)
Qeybta 3-xaad
May 7, 2022

Kelitalisnimada iyo Cilmiga

Ma jiro wax isaga eg kelitaliska iyo qof khaa'in ah oo awood leh oo loo xilsaaray ilaalinta xoolo ilmo agoon ah, kaasoo sida uu rabo ugu takrifala xoolahaa iyo agoonta qudhoodaba, maadaama ay yihiin kuwa da'doodu yar tahay oo taag daran. Sida aanu ninkaa isaga ah u jeclayn in agoontu qaan-gaarto oo ay hantidooda u maamushaan, ayaanu keltalisku u jeclayn in raciyaddiisu hesho iftiinka cilmiga.

Cabdiraxmaan Al Kawakibi

Kama qarsoona kelitaliska, si kasta oo uu doqon u yahay inuusan addoonsan karin kuna gabood-fali karin raciyaddiisa, haddii aysan ahayn kuwa doqomo ah oo ku dhex-hafanaya mugdiga jahliga iyo jahwareer indho la'aan ah. Haddii kelitalisku shimbir ahaan lahaa waxa uu ahaan lahaa fiidmeer ugaarsata xasharaadka xilliga mugdiga, haddii uu dugaag ahaan lahaana waxa uu ahaan lahaaa Dabacaddeeye (Xoor) ugaarsada digaagga xaafaddaha xilliga habeenkii ah, haseyeeshee waa aadamigii oo kiisii cilmiga lahaa uu ugaarsanayo kiisii jaahilka ahaa.

Cilmigu waa iftiin dhanka Alle ka yimid, kaasoo wax ifiya,
kulayl iyo awoodna dhaliya, cilmiguna sida iftiinka oo kale ayuu u yahay mid kheyrka bidhaamiya, sharkana fadeexeeya, nafta aadamiga ayuu dareen kulul ku abuuraa, madaxiisana qab ayuu geliyaa, aqoontu waa iftiin, dulmiguna waa mugdi, sida caadada ahna iftiinku waxa uu meesha ka saaraa mugdiga.

Marka la rogrogo xaaladda ay ku sugan yihiin qof kasta oo madax ah iyo kuwa uu madaxda u yahay, waxa muuqanaysa in awoodda iyo awood-darrida madaxdu ay xiriir toosan la leedahay aqoonta iyo aqoon-darrida dadka madaxda loo yahay.

Kelitalisku kama baqo cilmiga luqadda, kaasoo qaybina ay toosiso carrabka, in badan oo kamid ahna ay tahay dheel iyo hadaaq waqtiga lagu lumiyo. Waa dhab in cilmiga luqaddu aanu baqdin-gelin kelitaliska, haddii aanu carrabka luqaddaa adeegsanaya ka duulaynin xikmad iyo xamaasad col lagu dumo, amaba aftahannimo kala-dirta col duman, sabatuna waa iyada oo sida la ogyahay waqtigu had iyo jeer aanu ku deeqin in hooyooyinku dhalaan hal-doorro badan sida Al-Kumayt[1] iyo Xassaan[2] amaba Montesquieu[3] iyo Schiller[4].

Sidoo kale kelitalisku kama baqo cilmiga diinta, gaar ahaan midka khuseeya xiriirka addoonka iyo Rabigiisa iyo nolosha dambe ee aakhiro, sababtoo ah waxa uu rumaysan yahay in aanay aqoontaasu ka faydaynin dadka doqonimada iyo daboolka caqliga ka saaran, balse ay tahay mid ay ku baashaalaan kuwa aqoonta ku mamman, oo markii waqtigu ka lumo, maskaxduna ka buuxsanto, isla-weyninna la dibbiraan, ayay u arkaan in cilmigoodaas mid aan ahayn aanu jirin[5], goortaa ayuu kelitalisku ka nabadgalaa, sida looga nabad galo qof khamraysan, oo sakhraan ah. Haddiiba ay dhacdo in culimada noocan ah qaarkood dadka ka dhex muuqdaan, oo taageero ka helaan dadweynaha, kelitalisku ma waayo farsamooyin uu taageero uga helo, siyaasadihiisana ay kula jaan-qaadaan, isaga oo isugu dara inuu u madaxweyneeyo, xoogaa fool-baxsi ahna ka siiyo hambada xeerada kelitalisnimada.

Sidoo kale kelitalisku kama baqo cilmiga farsamada, sababtuna waa farsamayaqaannada oo ah dad nabaddeed, oo aan lahayn dareen weyn, damacooduna kooban yahay. Kuwaa oo ay ku filan tahay dhaqaale kooban iyo ammaan yar, sidoo kale kelitalsiku kama baqo qolyaha hantida jecel, oo had iyo jeer ku kooban naftooda, iyo kuwa cayaartooyda ah, oo badankood ay aragtidoodu kooban tahay.

---

[1] Al-Kumayt Ibn Zeyd Al-Asdi (680-743 M), Gabyaa kamid ahaa kuwii ugu caansanaa xilligii khilaafadii U mmawiyiinta.

[2] Xasaan Ibn Thaabit Al-Ansaari (554-674), Gabyaa kamid ahaa asxaabtii Rasuulka (NNKHA).

[3] Charles Louis de Secondant Baron de Montesquieu (1689-1755), faylsuuf siyaasdeed oo Faranssiis ahaa, waxa uu caan ku yahay aragtida “kala-soocidda awoodaha dowladda” oo in badan oo dastuurrada nidaamka dowladeed ee casriga ah saldhig looga dhigay.

[4] Johann Christoph Frederick von Schiller (1759-1805), Gabyaa, qoraa-riwaaydeed, faylassuuf iyo taariikhyan Jarmal ahaa.

[5] Marka la eego nuxurka qoraallada Al-Kawakibi, waxa muuqnaysa in uu ula jeedo culimada isku koobay axkaamta qaybta cibaadada, iyaga oo aanan dan u gelin waxa hareerahooda ka socda, oo saamayn togan iyo mid taban-ba ku leh nolosha iyo horumarka bulshada, isla markaana aan qayb ka ahayn dedaallada xalka loogu raadinyo culaysyada ay bulshadu waajahayso.

Kelitalisku waxa uu ka baqaa culuunta xiriirka la leh nolosha sida aragtiyada ku dhisan xikmadda, falsafadda, xuquuqda ummadaha, dhaqamada bulshada, siyaasadda madaniga, taariikhda iyo suugaanta af-maalnimada, iyo culuunta la hal-maasha oo kobcisa dareenka iyo maskaxda dadka, una bidhaamisa aadamiga xuquuqdiisa iyo sida loo dhagray, sida xuquuqdaa iyada ah lagu raadiyo, lagu helo, laguna difaacdo. Dadka uu kelitalisku ugu cabsida badanyahay waa aqoonyannada kuwooda ku dedaala in ay dadka baraan qaabka hadal-jeedinta iyo qoraallada, kuwaasoo ah kuwa uu quraanku ku sheegay inay yihiin kuwa wanaagsan oo wax wanaajiya, Alle wuxuu oranayaa (Dhulka waxaa dhaxli addoomadayda suubban)[6] sidoo kale ayuu Alle leeyahay (Eebbana uma halaago magaalo dulmi iyadoo ehelkeedu wax wanaajiynayaan)[7]. Inkasta oo culimada taageera kelitalisku ay ku fasiraan wanaagga iyo wanaajinta, cibaadada badan, sidoo kale ayay xumaanta iyo xumaynta macnaheedii uga baddaleen nidaamka Alle oo la burburiyo, uguna macneeyeen in loola jeedo kelitaliska oo la carqaladeeyo.

Sida kelitalisku uu uga caroodo natiijooyinka ka dhasha cilmiga, ayuu cilmiga qudhiisa uga caroodaa, saabtuna waa cilmiga oo ah awood ka sarraysa awooddaha oo dhan, wuxuuna had iyo jeer kelitalisku dreemaa inuu yahay qof hooseeya oo daciif ah, goor kasta oo ay indhihiisu qabtaan qof ka aqoon sarreeya. Sidaa ayaanuna kelitalisku u doonayn inuu arko wejiga aqoonyahan caqli badan oo ka aragti sarreeya, oo haddii uu u baahdo Dhaqtar ama Injineer waxa uu raadsadaa mid doqon ah, oo dulli ah, oo kaba-qaad ah. Waana xeerkan midka uu Ibn Khalduun ku saleeyay oraahdiisa ah (Kabaqaadku si sahlan ayuu ku guulaysta), middaa iyada ahna waa dabeecadda dadka kibirsan iyo guud ahaan dadka intooda badan, waana ta keentay in ay ammaanan miskiin kasta oo caano-madaadshe ah, oo aan laga rajo qabin in uu wax tillaabo ah qaado, kheyr iyo shar mid ay ahaataba.

Halkaa waxaa ka cad in kelitaliska iyo cilmiga uu u dhexeeyo dagaal joogto ah, iyo is cayrsasho aan dhamaad lahayn: Culimadu waxa ay ku dedaalaan in ay dadka maskaxda u furaan, kelitaliskuna waxaa uu ku hawlan yahay daminta iftiinka maskax-furka, waxayna labadooduba kala jiidanayaan dadweynaha, oo waa ayo dadweynuhu? Dadweynuhu waa kuwa haddii aanay aqoon lahayn cabsada, goorta ay cabsadaana hogaansama, sidoo kalena dadweynuhu waa kuwa haddii ay waxbartaan hadla, goorta ay hadlaana waxqabad raacsiiya.

Dadweynuhu waa awoodda iyo quudka uu ku dhisan yahay kelitalisku, ayaga ayuu awooddiisa iyo haybaddiisa ku muujiyaa, maskaxda ayuu ka qabsadaa, iyaguna ammaan iyo bogaadin ayay ku soo dhoweeyaan awooddiisa, xoolahooda ayuu dhacaa, iyaguna waxa ay ku ammaanaan inuu badbaadiyay oo aanu qudha ka jarin, wuu dulleeyaa, iyaguna waxa ay ku ammaanaan sarrayntiisa.

[6] Al-Anbiyaa': 105
[7] Huud:117

Madaxa ayuu isu geliyaa oo waa uu isku diraa, iyaguna siyaasaddiisa hoggaamineed ayay ku ammaanaan, haddii uu xoolahooda ku baashaalo, waxa ay ugu yeeraan in uu yahay deeqsi, haddii uu laayo oo aanu hilbahooda jarjarinna waxa ay u qaataan in uu u naxariistay, waddada geerida ayuu ku foofiyaa iyaguna wey u hogaansamaan si aanu u canaanan, haddii ay soo baxaan geesiyaal horjoogsada falalkiisa, waxa uu ula dagaalamaa sida cadow soo duulay.

Haddii si kale loo yiraahdo dadweynuhu gacmahooda ayay isku gawracaan, taasoo sababteedu tahay cabsida ku salaysan aqoon-darrida iyo doqonnimda. Haddaba haddii aqoon-darridaasi meesha ka baxdo, maskaxduna furanto, cabsiduna way dhamaataa, dadkuna waxa ay noqonayaan kuwa dantooda raacda, sida horay loo yirina: Caaqilku waa kan dantiisa ka shaqeeya, sheekadu marka ay halkaa gaartana kelitalisku waa inuu iska tago ama is toosiyo. Ummado badan ayaa ku guulaystay in ay wax ka baddalaan kelitalisyadii hoggaanka u ahaa, kuwaa oo isu baddalay kuwa ummadda wakiil ka ah, ogna in xisaabi sugayso, iyo hoggaamiye caadil ah, oo og in dhibkii uu gaysto laga gudayo, iyo Aabbe dulqaad badan oo muujinaya jacayl. Taasina waa midda keentay in ummaddaahsu ku noolaadaan nolol ay raali ka yihiin oo deggan, barwaaqo iyo horumar leh, sharaf iyo liibaanina ku dheehan tahay.

Hoggaanka qudhiisa ayaa ah midka helaya faa'iidada ugu badan ee ka dhalata isbedelkan, kadib markii uu hoggaamiyaha kelitaliska horay ugu ahaa midka aadananha ugu ayaan daran, oo had iyo jeer ay dadkiisu u caraysan yihiin, kana cabsi qaba in ay khatari kaga timaado, amniga taliskiisa iyo kan noloshiisana aanan hubin, isla markaana aanan haysanin cid talo ka siisa wiixii aanu garanayn, taa oo sababteedu tahay dadka la jooga oo si kasta oo ay u caqli badan yihiin, ka cabsi qaba in uu lafahooda u dhibataateeyo, taasoo keenaysa in ay ka haybaystaan, oo halkii ay talo sax ah siin lahaayeen waxa ay marka hore eegaan halka kelitalisku u janjeero, dabadeedna waxa ay ku taageeraan halka uu ku mamman yahay, iyaga oo aanan u eegin in arrinkaasi yahay sax iyo khalad. Cid kasta oo madaxda caynkaa ah la talisa oo sheegata in aanay cabsanina waa beenaalayaal, sida dhabta ahna runtu maba gasho qasriyada madaxda, sidaa darteed ayaanu kelitalisku ugaga faa'iidaysanin aragtida dadka kale, wuxuuna had iyo jeer ku nool yahay dayac, labalabayn, shiddo iyo cabsi, taa ayaana ugu filan aargudasho falalkiisa kelitalisnimada ah ee uu dadka ku addoonsaday, kuwaa oo uu Allahood uumay iyaga oo xor ah.

Cabsida uu kelitalisku ka qabo aargudasha dadka uu hoggaamiyo ayaa ka badan midka dadku ay ka qabaan in uu iyaga dhibaateeyo, cabsida kelitalisku waxa ay ku salaysantahay garashadiisa uu garanayo waxa uu dhankooda ka mudan doono. Cabsida dadkuna waxa ay ku salaysan tahay aqoon-darri, cabsidiisu waa caajisnimo dhankiisa ah, cabsidoodana waa malawaal in ay lugooyo la kulmi doonaan, cabsidiisu waa inuu lumiyo awoodiisa iyo naftiisa, cabsidooduna waa inay nolol maalmeedkooda lumiyaan, iyo inay dalka ka qaxaan, cabsidiisu waa inuu waayo waxkasta oo dunida uu ka taliyo

guudkeeda saaran, cabsidooduna waa inay lumiyaan nolosha liidata ee ay ku nool yihiin oo qura.

Markasta oo uu kordho dulmiga iyo cadaadiska kelitalisku, cabsidiisa uu ka qabo dadka uu hogaamiyo iyo kuwa isaga la shaqeeya oo gacanyaraha u ah, ayaa korordha, sidoo kale muuqaal-maskaxeedyada iyo dareennada cabsida ayaa ku bata, Waxa ugu badan oo laga dhaxlo nolosha kelitalisnimadana waa waalli dhamaystiran. Waxaan iri waalli dhamaystiran, waayoo marka horaba kelitalisku kama marna dhaandhaanimo, maadaama uu ka dido inuu baaris ku sameeyo xaqiiqooyinka dhabta ah ee jira, haddii ay dhacdo in la arko kelitalis aan dhaandhaan ahayn ciriiriga uu ku jiro dartii geerida ayaa u soo degdegta, waana haddii uu ka badbaado waallida iyo isku-dhexyaaca maskaxda. Waxaan iri kelitalisku wuxuu ka cabsadaa dadka gacanyaraha u ah, sababtuna waa iyaga gacnyarayaasha ah, ayaa ah kuwa uu kelitalsiku dhibka ugu badan u geysto, kuwaasi oo ah kuwa uunka Alle ugu nolol liita oo ba'a iyo hooggu ay uu isu biirsadeen, sababtuna waa iyaga oo ku kaca falal-dambiyeed aad looga argagaxo iyaga oo u adeegaya kelitaliska, iyo sidoo kale iyaga oo har iyo habeen isku hawla in ay ogaadaan waxa kelitalisku ka doonayo in ay u sameeyaan, isaga oo aanan u dirin amaba aanan u sheegin. Xadgudub iyo ihaano intee la eg ayuu u geysanayaa marka ay sidaa u dhaqmayaan, iyaga oo aanan ogayn xogta dahsoon "gheybka", oo yaa gheybka og, ma nebiyada Alle mise awliyada? Waxaa dhab ah in gacanyaryaasha kelitalisku yihiin kuwa hoogay. Allahayoow adiga ayaan dambi dhaaf ku weydiistay! Ma jirto cid og gheybka, nebina ma oga, welina ma oga, cid arrinkaa sheegan karta oo aan Dajaal ahaynna ma jirto, cid rumaysan karta oo aan garaad-laawe ahayna ma jirto, Allahayoow adigaa yiri, oraahdaaduna waa xaq: (Eebaa og waxa maqan (gheybka), umana muujiyo waxa maqan ruuxna)[8], nabiyaddii aad soo dirtay nabigii ugu fadliga badnaana waa isagii oranayay (Haddii aan garanayo kheyrka waan badsan lahaa)[9].

Xeerarka culimada taariikhda ku xeeldheer ay tibaxeen waxaa kamida, in goorta ay isbarbardhigayaan kelitaliska sida Neyroon[10] iyo Teymoor[11] ay ku qiimeeyaan feejignaantooda iyo is ilaalintooda, halka marka ay kala dooranayaan madaxda caddaaladda wax ku xukumay sida Anuusharwaan[12] iyo Cumar Alfaaruuq[13] ay ku qiimeeyaan heerkii ay gaarsiisnayd kalsoonidii ay ku qabeen in ay nabad kula nooladaan bulshadooda.

[8] Al-Jinn: 26

[9] Waxaa suurowda in uu ula jeedo macnaha aayadda 118 ee Suurdda Al-Acraaf.

[10] Nero Claudius (37-68), hogaamiyhihii Boqortooyadii Roomaanka, sannadihii (54-68 M).

[11] Timur (Timūr Gurkānī), (1336-1405 M), abbaanduulihii Turkida-Mangoolka iyo hogaamiyihii aasaasay Boqortooyadii Timur.

[12] Khosrow 1, waxa kale oo loo yaqaan Anushirvan, (501-579), hogaamiyihii (Boqorkii Boqorrada) Boqortooyada Saasaaniyiinta , sannadihii (531-579 M).

[13] Amiir Al-Mu'miniin Cumar Ibnu Khadab (584-644 M), khaliifkii labaad ee muslimiinta, sannadihii (634-644 M).

Maadaama diimaha badankoodu ay salka ku hayaan mabda'yda kheyrka iyo sharka, sida iftiinka iyo mugdiga, qoraxda iyo meeraha Raage (Saturn), caqliga iyo Shaydaanka, qaar kamida ummadihii hore ayaa u arkayay in arrinka dhibaatada ugu badan ku haya aadmiga uu yahay jahliga, raadka ugu xun oo uu jahligu ka tagana inuu yahay cabsida, sidaa darteed ayey jahliga u sameeyeen taallo ay caabudaan si ay sharkiisa uga nabadgalaan.

Mid kamida dadka siyaasadda wax ka qora ayaa yiri: Waxaan arkaa in qasriga kelitaliska ee xilli kasta uu yahay cabsida lafteeda: Boqorka dadka muuquuniya waa kii la caabudayay, gacan-yaryaashiisuna waa wadaaddada, maktabaddiisuna waa kawaanka barakaysan, qalimaantuna waa middiyaha, ereyda lagu ammaanayo oo lagu buunbuuninayana waa ducooyinkii, dadkuna waa maxaabiistii loo loogayay cabsida, cabsiduna waa mid kamida dabeecadaha ugu muhiimsan ee aadamiga. Aadamiguna mar kasta oo uu cabsida ka fogaado waxaa u dhamaystiranta dadnimadiisa, mana jirto hannaan lagu yarayn karo amaba meesha looga saari karo cabsida oo aan ahayn in si dhib ah aqoon loogu yeesho cidda laga cabsanyo, taasoo aadmiga u caddaynaysa inaanayba jirin wax laga cabsado, sidaa ayeyna markasta oo ay kororto aqoonta aadamigu u leeyahay in kelitalisku yahay shakhsi awooddiisu kooban tahay oo sidooda oo kale ah, ayay cabsidu meesha uga baxdaa, xaqoodana ay u soo dhacsadaan.

Dadka aragtida dheer waxa ay yiraahdaan tusaalaha ugu wanaagsan ee muujinaya heerka kelitaliska ee xukuumadaha, waa ku-talaxtagga buunbuuninta boqorrada, dhismayaasha waaweyn, xafladaha ballaadhan, habmaamuuska, iyo astaamaha is buunbuuninta, iyo wixii la halmaala oo ay boqorradu ugu talogaleen in ay dadweynaha ku cabsigeliyaan, taasoo meesha ka saaraysa caqligii iyo xorriyaddii. Hannaankaa dhagarta ahna waa midka ay boqorradu miciin bidaan, sida qofka sharaf-laawaha ah uu islaweynin u miciinsado, kitaab-gaablowguna suufinimo u miciinsado, beenlowguna dhaar u miciinsado, faqiirkuna dhar qurxan u miciinsado.

Xeeldheerayaashu waxa ay oronayaan, in addoonsi ama xorriyadi ummad ku xididaysatay waxaa tusaale u ah yaraanta ereyda tilmaama astaamaha weyneynta iyo buunbuuninta ee ku jira luqadda ay ku hadlaan sida Carabiga, ama badnaanta ereyada tilmaamaya is-dulleynta sida Faarisiga, amaba luqadda dhinacyada is la hadlaya aanay adeegsanayn aniga iyo adiga, taa badalkeedana ay isugu yeerayaan addoonkeygii iyo sayyidkeygii.

Haddii aan soo koobno kelitaliska iyo aqoontu waa laba dhinac oo iska soo horjeeda, oo uu loolan adag u dhexeeyo, maamul kasta oo kelitalis ah waxa uu ku dedaala in uu bakhtiiyo iftiinka aqoonta, dadweynahana uu ku oodo mugdiga jahliga. Aqoonyhanka caqliga leh ee ka soo dhexbaxa bulshooyinka kelitalisnimadu aafaysay, waxa ay ku dedaalaan sidii ay dawdweynaha maskaxda ugu furi lahaayeen, sida badanna kelitalisku wey baacsadaan aqoonyahanka caynkaa ah, maraqooda ayayna cabbaan, midkooda nasiibka leh ayaa ah kii ku guuleysta inuu dalkiisa ka baxsado, waana sababta ay dhammaan nebiyadii Alle soo diray nabadgelyo iyo naxariisi dushooda ha ahaatee, iyo badanka aqoonyhnka, saxafiyiinta iyo suugaanyahanada sharafta leh ay dalal badan oo adduunka ah isaga tallaabeen, kadibna ayaga oo qurbajoog ah geeriyoodeen.

Islaamku waa diintii ugu horeysay ee dadka ku baraarujisay aqoonta, waxaana tusaale ugu filan in ereygii ugu horreeyay ee quraanka uu ahaa mid faraya wax-aqrinta oo weliba dhowr jeer lagu soo celceliyay, gallaaddii ugu horraysay oo uu Alle weyneeyay uguna gallad-sheegtay aadamiga waa inuu baray qalinka, isla markaana qalinka uu ku baray wax aanay horay u garanayn. Culimadii horana (Salafka) waxa ay ujeeddada arrinkaa iyo gallad-sheegadaba u fahmeen in ay waajib ku tahay qof kasta oo muslim ah, barashada aqriska iyo qoraalka, sidaa darteed ayey qoraalka iyo aqriskuba noqdeen kuwa aad ugu faafay muslimiinta dhexdooda, aqoontuna u noqtay mid xor ah oo ay dadka dhammaantood heli karaan, iyadoo aan gaar ku ahayn culamaa'udiinka iyo asharaafta sidii ummaddihii hore, sidaa ayuuna cilmigu ugu faafay dhamaan ummadaha kale, ayaga oo kaga dayanaya muslimiinta! Nacalladdii Alle ha ku dhacdo kelitaliska dulleeyay aqoonta, oo ka dhigay badeeco la siiyo kuwa aanan waxna qorin waxna aqriyin, iyada oo aanay jirin cid ku dhiiran karta in ay arrinkaa is-hortaagto, naclladda Alle ha ku dhacdo kelitaliska ummadda dib ugu celiyay jahli iyo aqoon-darri, isaga oo dib ugu celinaya jahligii hore ee laga soo badbaadiyay, laa xawla walaa quwata illaa bilaah.

Culimada arrimahan ku xeeldheer waxa ay sheegeen, in waxa ugu badan oo kelitaliska reer galbeedku ka baqayaan ay tahay in dadku ogaadaan xaqiiqada ah in xorriyaddu ka qiimo badan tahay nolosha, aqoonna u yeeshaan nafta aadamiga iyo karaamadeeda, sharafta iyo qiimaheeda, xuquuqda iyo sida loo ilaashado, dulmiga iyo sida la isaga caabbiyo, aadamiga iyo hawlaha loo igmaday, naxariista iyo macaankeeda.

Halka kelitaliska reer barigu uu qalbigoodu la gariirayo cabsida ay ka qabaan awoodda cilmiga, sidii iyada oo cilmigu yahay dab, jirkooduna uu ka samaysan yahay baaruud. Kelitalisku waxa uu ka cabsadaa cilmiga, xataa in dadka la baro macnaha kalimadda towxiidka "Laa Ilaaha Illa Laah", waa maxay sababta kalimaddaasu u noqotay midda ugu wanaagsan ee Alle lagu xuso, iyo aasaaska Islaamka iyo sidoo kale aasaaska diimaha oo dhan? Sababtu waa macnaha kalimadda oo ah: inaanu jirin mid xaq lagu caabudo oo aan ahayn Allaha weyn ee kownka sameeyay, macnaha cibaadaduna waa is-dulleyn, waana halka uu ka yimid ereyga addoon, sidaa darteed ayuu macnaha "Laa Ilaaha Illaa Laahu" u noqonayaa : Ma jiro mid mudan in la isu-dulleeyo si xaq ah, oo

aan ka ahayn Alle. Mana jiro wax ka fiican in macnahaa uu ku soo laalaabto maskaxda aadamiga har iyo habeenba, si looga badbaado in lagu dhaco gaf keena in la isu-dulleeyo cid aan ahayn Alle.

Haddaba iyada oo xaalku sidan yahay, ma is waafaqayaan danaha kelitaliska iyo ogaanshaha dadka uu hoggaamiyaan ay ogaanayaan in aanu Islaamku ogolayn sarreyn iyo in addoon loo noqdo cid aan Alle ahayn. Qolo awood leh iyo Qolo loo awood sheeganayana aanay jirin, xirriirka isku xira kuwa Alle rumayayna, waa mid ku salaysan rumeyntooda Alle. Jawaabtu waa maya, oo danaha kelitaliska iyo fahamka dadweynuhu fahmaan xaqiiqada towxiidka waa kuwa iska horimanaya. Inta badanna kelitalisku waxa ay ku tiriyaan kalimadda towxiidka aflagaado iyaga loo gaysanayo, sidaa darteed ayay kelitalisku xilligan iyo waqti horaba u ahaayeen kuwa taageersan shirkiga iyo dagaalka lagu hayo aqoonta.

Sidoo kale aqoontu munaasib uma aha kelitaliska yaryar, sida adeegayaasha diimaha ee is-weyneysiiya, waalidka jaahilka ah, odayaasha qoysaska ee doqomada ah iyo dhammaan madaxda ururada taagta daran. Guntii iyo gabagabadiina markasta oo uu iftiinka aqoontu ummadda dhexdeeda ku faafo, waxaa go'a dabarka kelitalisku dadka ku xiray, waxaana xumaada masiirka kelitaliska haddii ay ahaan lahaayeen madaxda siyaasadda iyo madaxda diinta intaba.

WQ: Cabdiraxmaan Al Kawakibi
Tarjumadii Dr. Maxamed Sh. Cali (Doodishe)
Email: dodishe76@hotmail.com

Halkanka ka akhri

Dabeecaddaha Kelitalsinimada & Gaboodfallada ka Dhasha Midiidinta - Qeybta 1-waad

Dabeecaddaha Kelitalsinimada & Gaboodfallada ka Dhasha Midiidinta - Qeybta 2-baad